COVID-19 VACCINE

# TALAALLADA COVID-19

## Xog ku saabsan talaalka Pfizer ama Novavax

Qaybta 2
Agoosto 2024

Rialtas na hÉireann
Government of Ireland

## Xog ku saabsan buug yarahaan

Buug yarahaan ayaa xog guud ka bixinaaya talaaladaada COVID-19.

Waxaad ka helaysaa oonlaynka si aad u akhrido kahor inta aadan qaadan talaalka waxaana lagu siin doonaa buug yarahaan marka aad aado talaalka.

- Talaallada, xoojiyaasha iyo kuurooyinka dheeriga ah
- Talaallada la dhaqan gashay
- Uurka iyo naas nuujinta
- COVID-19 iyo Carruurta
- Talaallada lagu talinaayo oo lagu saleeyay da'da
- Waxa aad filanayso kadib talaalkaaga COVID-19.
- Mid kasta oo kamid ah labada talaal - ciladaha ka dhalan kara iyo marka aad qaadanayso talaal gaar ah

  **Talaallada COVID-19 ee Pfizer – oo sidoo kale la yiraahdo Comirnaty**
  - » Ciladaha ka dhalan kara talaallka Pfizer
  - » Marka ay tahay in aadan qaadan talaalka Pfizer

  **Talaallada COVID-19 ee Novavax – oo sidoo kale la yiraahdo Nuvaxovid**
  - » Ciladaha ka dhalan kara talaallka Novavax
  - » Marka ay tahay in aadan qaadan talaalka Novavax
- Wakhtiga loo baahan yahay si talaalladu u shaqeeyaan
- Soo gudbinta waxyeeladda talaallka
- Xogtaada shaqsiga ah
- Marka ay tahay inaad hesho xog dheeri ah

Qofka ku siinaaya talaalka ayaa ka jawaabi kara su'aalo kasta oo aad ka qabi karto kadib marka akhrido buug yarahaan.

Fadlan hayso buug yarahaan, maadaama aad u baahan karto si aad dib ugu tixraacdo.

Haddii aad dooneyso nuqulka turjuman ee buug yarahaan, booqo **www.hse.ie/covid19vaccinematerials**

## Xog ku saabsan talaalkaaga COVID-19

Talaallada COVID-19 waa qaabka ugu wanaagsan ee naftaada looga difaaco COVID-19. Ilaa markii talaallada la bilaabay, waxaan aragnay inay yaraadeen dadka xanuunka xun ka qaadaaya iyo kuwa u dhimanaaya fayraska awgiis wadanka Ireland.

Helitaanka talaalka COVID-19 ayaa yareynaysa khatartaada dhibaatooyinka daran ee ka dhasha COVID-19. HSE ayaa talaalaysa dadka ku nool Ireland si looga difaaco cudurka loona sii wado yareynta tirada dadka qaba xanuunka daran iyo tirada dadka u dhinta cudurka.

Buug yarahaan waxaa ku oqran xog ku saabsan talaallada hadda ee barnaamijka talaalka COVID-19 ee Ireland: **Pfizer** iyo **Novavax.**

## Talaallada, xoojiyaasha iyo kuurooyinka dheeriga ah

Marka aan ka hadlayno talaal – ama talaallada – buug yarahaan, waxaan uga jeednaa:

- Kuurada aasaasiga ah – kuurada koobaad. Carruurta qaar oo jira 6 bilood ilaa 4 sano ayaa u baahan kara kuuro labaad oo ah kuuradooda aasaasiga ah. Dadka nidaamkooda difaacu liito ayaa u baahan doona kuuro labaad oo ah kuuradooda aasaasiga ah dadka qaarna waxay u baahan karaan kuuro sadexaad.
- Kuurooyinka xoojinta ayaa lagugula talin karaa dadka qaar ayadoo lagu saleynaayo da'dooda ama taariikhda caafimaadka.

### Kuurada aasaasiga ah

Kuurada aasaasiga ah ee talaalka COVID-19 ayaa lagula talinayaa:

- Dadka jira 60 sano iyo ka wayn.
- Dadka jira 18-59 ee ku nool xarumaha daryeelka mudada dheer ee waayeelka.
- Dadka jira 6 bilood-59 sano ee qaba:
  - daciifnimada difaaca jirka oo la xiriira fal celinta suboptimal ee talaalka.
  - qaba xanuunka caafimaad ee la xiriira khatarta sare ee ah in isbitaal loo dhigo COVID-19, xanuunka daran ama u dhimashada.
- Shaqaalaha caafimaadka iyo daryeelka.
- Dhawr iyo tban jirada iyo dadka qaangaarka ah ee uurka leh.

Dadka jira 6 bilood-59 sano ee caafimaadka qaba, jadwalka rasmiga ah ee talaalka COVID-19 ayaan lagu talinayna in joogto loogu sameeyo. Hase yeeshee, waxaad heli kartaa kuurada aasaasiga ah ee talaalka COVID-19, haddii ay haboon tahay ayadoo lagu saleynaayo wada hadal aad la samaynayso dhakhtarkaaga (tusaale, GP (Dhakhtarka Guud), farmashiilaha ama talaal bixiyaha HSE).

Kuurada aasaasiga ah waa:

- Halka kuuro ee dadka jira 5 sano iyo ka wayn.
- Dadka jira 6 bilood ilaa 4 sano.
  - » Kuurada koobaad iyo labaad, oo ay 4 asbuuc u dhaxayso, haddii uusan caabuqa COVID-19 horay ugu dhicin.
  - » Halka kuuro, haddii uu horay u qabay caabuqa COVID-19.
- Kuurada koobaad iyo labaad, oo ay 4 asbuuc u dhaxayso, dadka jira 6 bilood iyo ka wayn ee nidaamkooda difaacu liito.

### Kuurada labaad

Kuurada sadexaad ayaa la siin karaa dadka nidaamkooda difaacu liito, 8 asbuuc kadib kuurada labaad ayadoo la raacaayo tilmaanta dhakhtarka taqasuska ee ay qusayso.

### Kuurooyinka xoojinta ah

Difaaca aad ka hesho talaallada hore ama difaaca aad ka hesho caabuqa COVID-19 ayaa daciifi kara muddo kadib. Kuurooyinka xoojinta ah ayaa kordhinaaya difaacaaga ka dhanka ah dhibaatooyinka daran ee COVID-19.

Kadib kuurada koobaad, kuurooyinka xoojinta ah ayaa lagu talinayaa in la siiyo dadka qaar. Si aad u hesho xog dheeri ah ama marka xigta ee aad qaadanayso talaalkaaga COVID-19 booqo **www.hse.ie** ama ka wac kooxdeena HSELive lambarka **1800 700 700.**

## Talaallada la dhaqan gashay

Waxaa lagu siin doonaa talaalkii ugu danbeeyay ee Comirnaty mRNA oo ay soo saartay Pfizer, ama dadka aan qaadan karin talaalka ama doorbidaaya inaysan qaadan talaalka mRNA, waxaa la idin siin doonaa noocii ugu danbeeyay ee talaalka Nuvaxovid COVID-19 oo ay soo saartay Novavax.

Talaallada la dhaqan gashay ee Comirnaty waxaa ku jira mRNA si looga hortagto faracyada cusub ee COVID-19. Waxaa la filayaa inay difaac guud ka bixiyaan fayracyada COVID-19 in ka badan talaalkii hore.

Talaalka Novavax sidoo kale waa talaalka COVID-19 oo la dhaqan gashay.

Talaallada la dhaqan gashay waxaa ku talinaaya Gudiga Qaran ee Talallo Bixinta Talaalka waxaana ansixiyay Wakaalada Daawooyinka ee Yurub.

**Muhiim:**

Tallada kasoo baxday Wakaalada Daawooyinka ee Yurub EMA iyo Gudiga Qaran ee Tallo Bixinta Talaalka NIAC ayaa kala duwanaan kara mararka qaar. Marka sidaan dhacdo, waxaan raacnaa tilmaanta NIAC ee Ireland.

## Uurka iyo naas nuujinta

Waa inaad qaadato talaalkaaga COVID-19 haddii aad uur leedahay.

Waa amaan in aad qaadato talaalka COVID-19 haddii aad naas-nuujinayso.

Haddii aad iskudayayso inaad uur yeelato ama aad uur qaadi karto uma baahnid inaad dib u dhigto qaadashada talaalka COVID-19.

Inta badan dadka uurka leh ee uu ku dhaco fayrasku, xataa haddii aysan qaadan talaalka COVID-19, ayaa dareema xanuunka fudud ilaa dhexe. Waxay ilmaha u dhalaan sidii loo qorsheeyay khatarta ah inay COVID-19 u gudbiyaan ilmahooduna wa amid hoosaysa.

Hase yeeshee, haddii uu kugu dhaco COVID-19 marka aad uurka leedahay waxay u badan tahay inaad si xun u xanuusato aadna u baahato in lagugu daweeyo qaybta daryeelka adag. Fayraska ayaa sidoo kale sababi kara dhibaatooyin ku dhaca ilmahaaga.

Ilmaha kayar 1 sano ayaa khatar dheeri ah ugu jira in isbitaal la dhigo ayna xanuun xun ka qaadaan COVID-19. Ilmaha dhashay ee hooyooyinkood talaalka qaateen intay uurka ku jireen, ayay u badan tahay inaysan u baahan daryeelka isbitaalka haddii uu ku dhaco COVID-19.

Waa amaan inaad qaadato talaalkaaga COVID-19 isla wakhtiga aad qaadanayso talaallada kale ee laguu siiyo uurka.

Haddii aad uur leedahay, waxay u badan tahay in lagu siin doono talaalka **Pfizer**. Kani waa talaalka nooca mRNA – talaal u sheega jirkaaga sida loo sameeyo difaacyada jirka ee ka caawiya kahortaga fayraska COVID-19.

Hase yeeshee, haddii dhakhtarkaagu kugula taliyo in aadan qaadan karin talaalka mRNA – talaalka **Novavax** ayaa lagu siin karaa kadib marka laga hadlo dhakhtarka – sida dhakhtar, umuliso ama bixiyaha talaalka – khataraha iyo faa'iidooyinka aad ka helayso.

Xog badan kama hayno isticmaalka talaalka **Novavax** ee haweenka uurka leh. Waxaad ka helaysaa xog dheeri ah barta **www.hse.ie.**

Haddii aadan qaadan kuuradaada aasaasiga ah, waxaa lagu siin karaa heer kasta oo aad marayso uurka.

**Haddii aad uur leedahay, kuurada xoojinta ah ee talaalka COVID-19** ayaa lagu talinayaa halmar inta aad uurka leedahay haddii laga joogo in ka badan 6 bilood ilaa markii aad qaadatay talaalka COVID-19 ama caabuqu kugu dhacay. Kuurada xoojinta ah ayaa lagu siin karaa heer kasta oo kamid ah uurka laakiin waxaa lagu talinayaa inta u dhaxaysa asbuucyada 20-34. Waad qaadan kartaa wakhtigaas kahor haddii laga joogo in ka badan 12 bilood ilaa markii aad qaadatay talaalkaagii hore ee COVID-19 ama cabauqu kugu dhacay.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah waxaad la hadli kartaa xirfadle caafimaad oo aad ku kalsoon tahay.

Marka aad uur leedahay, waxaad keliya u baahan tahay hal kuuro oo ah talaalka COVID-19. Hase yeeshee, haddii aad uur leedahay ama aad qabto nidaamka difaaca jirka oo liita waxaad qaadan kartaa kuurada labaad ugu yaraan 6 bilood kadib talaalkaaga ama cabauqa ugu danbeeya ee COVID-19.

## COVID-19 iyo Carruurta

Inta badan carruurta uu ku dhaco COVID-19 ayaa yeesha xanuun aad u fudud ama aanba lahayn wax xanuun ah.

COVID-19 wuxuu sababi karaa xanuun daran, in isbitaal lagu dhigo ama dhimasho ku timaada carruurta, laakiin waa mid aad dhif u ah. Iskasta oo khatarta isbitaal dhigista iyo xanuunka daran ay aad ugu yar yihiin carruurta, waxay u badan yihiin ilmaha dhawaan dhashay.

Mararka qaar astaamaha la xariira COVID-19 ayaa sii socon kara asbuucyo ama bilo. Kan waxaa loogu yeeraa 'COVID ka dheer'. Khatarta cudurkaan way ku yar tahay carruurta marka loo eego dadka waawayn.

Khatar ah in ilmaha isbitaal loo dhigo COVID-19 awgiis ayaa aad u hoosaysa, iyo khatarta in cunug kasta u baahdo daawaynta daryeelka adag ayaa aad u yar.

Carruurta qaba xanuunnada qaarkood ayaa khatar dheeraad ah ugu jira inay aad ugu jiradaan ama isbitaal la dhigo hadduu ku dhaco COVID-19.

Marar dhif ah, COVID-19 ayaa keeni kara xanuun loogu yeero Hulaaqa Qaybaha Badan ee Jirka oo ku dhaca carruurta (MIS-C).

Xanuunku wuxuu keenaa burukiito, hulaaqa wadnaha iyo dhibaato la xariirta neefsiga. Inta badan ilmaha uu ku dhaco MIS-C ayaa soo bogsooda kadib marka isbitaalka la dhigo ama daryeelka adag lagu sameeyo tiro aad u yar ayaana u dhiman kara.

## Ogolaanshaha talaalka cunugaaga

Waalidka ama masuulka shaqsiga ah ayaa laga codsan doonaa inuu ogolaado talaalka cunug kasta.

Go'aankaaga bixinta ogolaanshaha talaalka ama diidista ayaan la ixtiraami doonin.

Liiska khulaasada ee hoose ayaa ku anfici kara si aad u hesho xog ku saabsan dookhyadaada.

| Kasoo qaad in cunugaagu qaadanaayo talaalka haddii: | Kasoo qaad inaan cunugaagu qaadan talaalka, ama uu sugaayo ilaa xog badan kasoo baxayso, haddii: |
|---|---|
| • Cunugaagu qabo xanuunka uur ku jirta oo khatar wayn u gelinaaya inuu xanuun xun ka qaado COVID-19.<br>• Cunugaagu uu la nool yahay ilmo ama qof wayn oo khatar wayn ugu jira inuu aad ugu xanuunsado COVID-19.<br>• Aad doonayso inaad kordhiso difaaca cunugaaga ka helaayo xaalada aadka dhifka u ah ee xanuunka daran ee COVID-19, Xanuunka Caabuqa Xubnaha Badan ama 'COVID muddo dheer socda'. | • Aadan doonayn inaad khatar u gasho cilada khatarta dhifka ah ee xanuunnada myocarditis iyo pericarditis ee talaalka ka dhasha.<br>• Aad dooneyso inaad sugto inta xog dheeri ah laga helaayo khatarta Xanuunka Fashfashka Nidaamyada Badan iyo COVID-19 ku leeyihiin carruurta.<br>• Aad doonayso inaad sugto xog dheeraad ah in laga helo khataraha mudada fog ee talaalladu ku reebayaan carruurta iyo dhalinta. |

| Faa'iidooyinka talaalka: | Khataraha talaalka: |
| --- | --- |
| • Difaac ka dhan ka COVID-19.<br>• Difaaca carruurta qaba xanuunnada khatarta sare u gelinaaya xanuunka daran ee COVID-19.<br>• Difaaca carruurta caafimaadka qaba ee ka dhanka ah COVID-19 – inkasta oo tani aad ugu yar tahay ilmaha da'daan. Khatar ah in ilmaha isbitaal loo dhigo COVID-19 awgiis ayaa aad u hoosaysa, iyo khatarta in cunug kasta u baahdo daawaynta daryeelka adag ayaa aad u yar.<br>• Difaaca laga helo COVID-19, iyo dhibaatooyinka ka imaanaaya COVID-19 sida 'COVID muddo dheer' iyo xanuunka hulaaqa mudada dheer ee nidaamyada badan ee ku dhaca carruurta.<br>• Wuxuu naga caawin karaa kahortaga ku faafitaanka COVID-19 dadka kale. Tan ayaa si gaar ah muhiim u ah haddii carruurta iyo dadka yaryar ay la nool yihiin walaaladood ama qof wayn oo khatar ugu jira xanuunka daran COVID-19. | • Ciladaha ka dhalan kara ee mudada gaaban sida gacan xanuunka, qandho iyo daal.<br>• Ku dhawaad 1 kamid ah 100,000 ee qof ayaa qabi kara ciladaha daran ee ka dhalan kara, sida xasaasiyad aad ka qaado talaalka.<br>• Marar aad dhif u ah dadka qaar ayaa qaada hulaaqa wadnaha (myocarditis) iyo mid ku dhaca xididada wadnaha (pericarditis) kadib talaalka. Inta badan dadka ayaa kasoo kabta myocarditis iyo pericarditis laakiin waxay u baahan karaan in isbitaal lagu daaweeyo.<br>• Ma hayno xog ku saabsan ciladaa mudada Fog ee talaallada COVID-19 ku reebaan carruurta. |

## Talaallada lagu talinaayo oo lagu saleeyay da'da

Dhammaan talaallada COVID-19 ayaa ku siinaaya difaac wanaagsan oo ka dhan ah xanuunka daran ee COVID-19 marka aad qaadato:

- kuuradaada aasaasiga ah
- kuurooyin kasta oo xoojin ah oo laguu qoray.

Gudiga Qaran ee Tallo Bixinta Talaalka NIAC ayaa ku talinaaya in aad qaadato talaalka mRNA ee COVID-19 ee la dhaqan gashay – **Pfizer** oo noqonaaya kuuradaada aasaasiga ah iyo kuurooyin kasta oo xoojin ah, xataa haddii aad qaadatay talaal nooc kale ah hadda kahor.

**Tallada lagu saleeyay da'da kooxda:**

Haddii aad tahay:

- 6 bilood iyo ka wayn, waxaa lagu siin doonaa talaalka **Pfizer** ee COVID-19

Haddii aadan qaadan karin talaalka mRNA ama aad doorato in aadan qaadan talaalka mRNA, waxaa lagu siin karaa talaalka **Novavax**. **Novavax** ayaa loo ogolaaday in loo adeegsado dadka jira 12 sano iyo ka wayn.

## Waxa aad filanayso kadib talaalkaaga COVID-19.

Si lamid ah dhammaan daawooyinka, talaallada ayaa sababi kara **cilado ka dhalan kara.** Inta badan dhibaatooyinkaan ayaa ah kuwo fudud ilaa kuwo dhexe, mana ahan wax qof kasta ku dhaca.

Ciladaha ka dhalan kara oo daran, sida xasaasiyad xun, ayaa aad u yar. Talaal bixiyahaaga waxaa loo tababaray inuu daaweeyo xasaasiyaadka daran ee dhifka ah.

Ciladaha ka dhalan kara ayaa kala duwanaan kara talaal kasta waana inaad akhridaa buug yarahaan iyo warqada xogta bukaanka ee shirkada samaysay talaalka aad qaadanayso. Warqada xogta ee shirkada daawada samaysay **www.hse.ie** ama waxaan ku siin karnaa nuqulka maalinta aad qaadanayso talaalka.

Qaybta xigta, waxaan ku siin doonaa ciladaha ka dhalan kara ee lagu yaqaano labada talaalka ee COVID-19 oo lagu faahfaashay buug yarahaan, waxaana kuu sheegi doonaa sida ay u badan yihiin ama dhifka u yihiin. Waxaan sidoo kale tilmaamaynaa cida ay tahay inaysan qaadan talaal kasta. Waxaad ka helaysaa xog dheeri ah **www.hse.ie**.

## 2 talaal – ciladaha ka dhalan kara iyo marka ay tahay in aadan qaadan talaal gaar ah

Bogaga soo socda, waxaan kuu sheegi doonaa ciladaha ka dhalan kara iyo marka ay tahay in aadan qadan talaal gaar ah. Waxaan kala qaybinaa ciladaha ka dhalan kara, kuwo badanaa dhaca ilaa kuwo aad naadir u ah.

- Kuwa aadka u badan – in ka badan 1 kamid ah 10-kii qof
- Kuwo badan – ilaa 1 kamid ah 10-kii qof ah
- Aan badnayn – ilaa 1 kamid ah 100-kii qof
- Naadir ah – ilaa 1 kamid ah 1,000-kii qof
- Aad naadir u ah – ilaa 1 kamid ah 10,000-kii qof
- Si xad dhaaf ah naadir u ah. Wali lama garanaayo cadadka dadka talaalkaan qaatay ee ay ku dhici doonaan ciladahaan laakiin waxaa la filayaa inay aad dhif u yihiin.

Inkasta oo talaallada kaladuwan ay sababi doonaan cilado kaladuwan si guud, waa inaad dareen gaar ah siisaa ciladaha ka dhalan kara talaalka aad qaadanayso. Magaca talaalka ayaa ku qoran kaarka diiwaanka ee talaal bixiyahaagu ku siin doono iyo bogaga buug yarahaan. Waa inaad raadisaa ciladaha ka dhalan kara inta lagu jiro saacadaha iyo maalmaha kadib talaalkaaga.

# Talaallada COVID-19 ee Pfizer *– oo sidoo kale la yiraahdo Comirnaty*

Ciladaha ka dhalan kara iyo inta jeer ay dhici karaan ayaa hoos ku qoran, ayadoo la raacinaayo marka ay tahay inaadan qaadan talaalkaan. Haddii aad qabto wax shaki ah, markasta waydii xirfadle caafimaad oo aad ku kalsoon tahay.

| Dhibaatooyinka ka dhalan kara daawada: | |
|---|---|
| **Aad u badan**<br>Wax ka badan 1 kamid ah 10-kii qof | • dareemida daal<br>• adkaan (carruurta jira 6 bilood ilaa 23 bilood) ama xanuunka iyo bararka meesha lagaa dhuftay cirbada talaalka.<br>• madax xanuun<br>• murqo xanuun<br>• xanuunka kala goyska<br>• Shuban<br>• qandho – heerkulka 38 digrii Celsius ama ka badan – ama qarqaryo<br>• gaduudashada meesha talaalka lagaag duray (ilmaha jira 6 bilood ilaa 11 sano)<br>• cuncun (ilmaha jira 6 bilood ilaa 23 bilood)<br>• omateed yari (ilmaha jira 6 bilood ilaa 23 bilood)<br>• dawakhaad (ilmaha jira 6 bilood ilaa 23 bilood) |
| **Badanaa dhaca**<br>Ilaa 1 kamid ah 10-kii qof | • lalabo<br>• matag<br>• gaduudashada meesha talaalka lagaag duray<br>• qanjiro bararka. Tan ayaa ku badan kadib kuurada xoojinta ah.<br>• finan (ilmaha jira 6 bilood ilaa 23 bilood) |

| | |
|---|---|
| **Aan badnayn**<br>Ilaa 1 kamid ah 100-kii qof | • cuncunka meesha talaalka lagaag duray<br>• dawakhsanaan<br>• cuncun guud<br>• xasaasiyaadka sida finanka ama faruuraca ama bararka wajiga<br>• hurdo la'aan<br>• dhidid Xad dhaaf ah<br>• dhidid habaynkii ah<br>• omateed yari<br>• tamar la'aan, caajis ama xanuun<br>• xanuunka gacanta talaalka lagaa dhuftay |
| **Naadir ah**<br>Ilaa 1 kamid ah 1,000-kii qof | • hoos u dhaca ku meel gaarka ah ee geeska wajiga |
| **Aad naadir u ah**<br>Ilaa 1 kamid ah 10,000-kii qof | • myocarditis iyo pericarditis. Tan ayaa ka dhigan fashfashka murqaha wadnaha ama xididada murqaha wadnaha. Ka eeg bogga xiga astaamaha. |
| **Si xad dhaaf ah naadir u ah**<br>Inta jeer wali lama yaqaano | • xasaasiyad aad u xun<br>• Erythema Multiforme – xasaasiyada maqaarka oo keenaysa nabaro cas ama cabaar kasoo baxda maqaarka oo u ekaan karta shiish ama "isha dibiga" oo leh dhexda casaanka madoowga xiga oo ay ku meegaaran yihiin goobino faraanti u eg<br>• bararka wajiga haddii aad isticmaasho daawada wajiga<br>• bararka xad dhaafka ah ee gacanta – ama lugta – meesha lagaaga duray talaalka<br>• dikaan ama kabuubuyo, ama luminta dareenka qaybo kamid ah jirka<br>• dhiiga caadada oo aad u badan |

Myocarditis iyo pericarditis waa hulaaq ku dhaca wadnaha. Khatarta xaaladahaan aadka dhifka u ah ayaa ku badan labka da'yarta ah.

Xanuunnadaan ayay u badan tahay inay dhacaan kadib kuurada labaad waxayna badanaa dhacdaa 14 maalmood gudahood marka talaalka la qaato.

Tijaabooyinka Yurub samaysay ayaa qiyaasay khatarta myocarditis, kadib marka kuurada labaad ee talaalka la qaato:

- Hal kiis oo dheeraad ah 38,000 ee rag ahba oo jira 12 ilaa 29 (7 maalmood gudahood)
- Hal kiis oo dheeraad ah 17,500 ee rag ahba oo jira 16 ilaa 24 (28 maalmood gudahood)

Xogta la heli karo ayaa muujinaysa in xanuunka myocarditis iyo pericarditis kadib kuurada aasaasiga ah ee carruurta jira 5 ilaa 11 sano uu aad naadir u yahay uuna kayar kan ilmaha jira 12 ilaa 17 sano. Heerarka myocarditis iyo pericarditis kadib kuurooyinka xoojinta ah aysan u muuqan kuwo ka badan kadib kuurada labaad ee taxanaha aasaasiga ah.

Inta badan dadka ayaa iskood u bogsooda ama marka daawo kaalmaati ah la siiyo, laakiin waxay u baahan doonaan in lagu daryeelo isbitaal. Wali ma naqaano haddii ay jiraan cilado mudada fog ah oo ka dhaln kara ciladahaan.

## Astaamaha myocarditis iyo pericarditis

Hel caawimaad caafimaad haddii aad leedahay wax kamid ah astaamahaan kadib marka aad qaadato talaalkaan:

- neefsi la'aan
- wadne bood – wadne garaac xawli ah oo aan ahayn mid quman
- Xabad xanuun

## Waa IN AADAN qaadan talaalka COVID-19 ee Pfizer Comirnaty haddii:

- Haddii aad xasaasiyad xun ka qaaday wax kamid ah maadooyinka talaalka, ayna ku jiraan polyethylene glycol ama PEG. Akhri Tilmaahaha Xogta Bukaanka ee shirkada daawada samaysay si aad u aragto liiska maadooyinka.
- Aad xasaasiyad xun ka qaaday kuuradii hore ee talaalka **Pfizer** ama talaalka **Moderna** Spikevax ee COVID-19.
- Aad xasaasiyad xun ka qaaday kadib maadada Trometamol – mid kamid ah maadooyinka shoocaaca bixiya ee lagu adeegsato daraasaadka raajada MRI.
- Uu kuu sheegay Dhakhtar in aadan qaadan karin talaalka **Moderna** Spikevax ee COVID-19 ama talaalka **Pfizer** ee COVID-19 sababo caafimaad awgood.

## La hadal Dhakhtarkaaga kahor inta aadan qaadan talaalkaan COVID-19 haddii aad:

- qaado xasaasiyad daran – anaphylaxis – waa hore, ayna ku jiraan talaal kasta oo kale ama daawada.
- uu kugu dhacay myocarditis iyo pericarditis – fashfashka muruqa wadnaha ama xididada wadnaha – kadib kuurada hore ee talaallada COVID-19.

Ilmaha horay u qabay Xanuunka Fasfhashka Nidaamyada Badan – MIS-C– way qaadan karaan talaalka COVID-19 marka ay soo bogsoodaan ayna ka joogaan 90 maalmood ugu yaraan kadib markii xanuunka laga helay, hadba kii soo horeeya.

Haddii aad dhawaan qaadatay MPOX – oo horay loo oran jiray Monkeypox – talaalka – Imvanex ama Jynneos – waa inaad sugtaa 4 asbuuc kahor inta aadan qaadan talaalka COVID-19 sabab la xiriirta khatarta aan la aqoon ee myocarditis.

# Talaallada COVID-19 ee Novavax *– oo sidoo kale la yiraahdo Nuvaxovid*

Ciladaha ka dhalan kara iyo inta jeer ay dhici karaan ayaa hoos ku qoran, ayadoo la raacinaayo marka ay tahay inaadan qaadan talaalkaan. Haddii aad qabto wax shaki ah, markasta waydii xirfadle caafimaad oo aad ku kalsoon tahay.

| Dhibaatooyinka ka dhalan kara daawada: | |
|---|---|
| **Aad u badan**<br>Wax ka badan 1 kamid ah 10-kii qof | • dareemida daal<br>• dareenka xanuunka guud<br>• madax xanuun<br>• Lalabo ama matag<br>• murqo xanuun<br>• xanuunka kala goyska<br>• adkaanta ama xanuunka gacanta lagaaga dhuftay cirbada talaalka |
| **Badanaa dhaca**<br>Ilaa 1 kamid ah 10-kii qof | • qandho (heerkul dhan 38 digrii ama ka badan)<br>• xanuunka qaarka kore<br>• casaadka ama bararka meesha lagaa dhuftay talaalka |
| **Aan badnayn**<br>Ilaa 1 kamid ah 100-kii qof | • qanjiro bararka<br>• kor u kaca cadaadiska dhiiga oo socda dhawr maalmood kadib talaalka<br>• qadhqadhyo<br>• nabaro<br>• gaduudashada maqaarka<br>• cuncun guud<br>• cuncunka meesha talaalka lagaag duray<br>• Finan |
| **Naadir ah**<br>Ilaa 1 kamid ah 1000-kii qof | • diiranaanta meesha lagaa dhuftay talaalka |
| **Si xad dhaaf ah naadir u ah**<br>Inta jeer wali lama yaqaano | • anaphylaxis – xasaasiyad aad u xun<br>• dikaan ama kabuubuyo, ama luminta dareenka qaybo kamid ah jirka<br>• myocarditis iyo pericarditis. Tan ayaa ka dhigan fashfashka murqaha wadnaha ama xididada murqaha wadnaha. |

### Astaamaha myocarditis iyo pericarditis

Myocarditis iyo pericarditis waa xanuunnada fashfashka wadnaha. Inkasta oo khatarta xanuunadaan ay aad u yar tahay, waa inaad taqaano astaamaha aad iska eegayso. Astaamahaan ayaa kugu dhici kara maalmo gudahood kadib marka aad qaadato talaalka waxayna inta badan kugu dhacayaan 14 maalmood gudahood. Hel caawimaad caafimaad haddii aad leedahay wax kamid ah astaamahaan kadib marka aad qaadato talaalkaan:

- neefsi la'aan
- Wadno gariir (wadno garaac xoog badan oo aan caadi ahayn)
- Xabad xanuun

### Waa IN AADAN qaadan talaalka COVID-19 ee Novavax (Nuvaxovid) haddii:

- aad xasaasiyad xun ka qaaday wax kamid ah maadooyinka talaalka, (ayna ku jirto polysorbate 80). Akhri Tilmaahaha Xogta Bukaanka ee shirkada daawada samaysay si aad u aragto liiska maadooyinka. Fadlan ogoow talaallada COVID-19 ee Janssen iyo Astrazeneca (Vaxzevria) waxaa sidoo kale ku jira maadada Polysorbate 80.
- aad xasaasiyad xun ka qaaday kuuradii hore ee talaalka.

### La hadal Dhakhtarkaaga kahor inta aadan qaadan talaalkaan COVID-19 haddii aad:

- uu kugu dhacay myocarditis ama pericarditis (fashfashka xididada wadnaha) kadib kuurada hore ee talaallada COVID-19.
- aad xasaasiyad xun qaaday (anaphylaxis) xili hore, ayna ku jiraan xasaasiyada talaal kale ama daawo.

Haddii aad dhawaan qaadatay MPOX (oo horay loo oran jiray Monkeypox) (Imvanex ama Jynneos) waa inaad sugtaa 4 asbuuc kahor inta aadan qaadan talaalka COVID-19 sabab la xiriirta khatarta aan la aqoon ee myocarditis.

## Waxa aad samaynayso haddii aad dareento qandho iyo xanuun.

Haddii aad qabto qandho ama xanuun, waxaad liqi kartaa paracetamol ama ibuprofen si xanuunku kaaga yaraado. Hase yeeshee, haddii qandhadaadu socoto wax ka badan 48 saacadood ama haddii aad wali walaac qabto, fadlan raadso daryeel caafimaad.

## Wakhtiga loo baahan yahay si talaalladu u shaqeeyaan

Waxay qaadanaysaa wakhti kadib marka aad qaadato talaalka, ilaa 14 maalmood, si nidamakaaga difaaca jirku uga jawaabo uuna kuu siiyo difaac ka dhan ah COVID-19.

Waxaa jirta cadeyn adag, oo la isku halayn karo oo sheegaysa in talaallada COVID-19 ay aad wax uga tarayaan kahortaga geerida iyo xanuunka daran ee COVID-19.

Waa inaad sidoo kale raacdaa taladii ugu danbaysay ee caafimaadka dadwaynaha ee ku aadan difaaca naftaada iyo dadka kale oo ku jirta **www.hse.ie**

## Sida loosoo sheego ciladaha ka dhalan kara

Waxaan wax ka baranay talaallada COVID-19. Haddii aad dareento ciladaha ka dhalan kara: kadib talaalka COVID-19, waxaan kaa codsanaynaa inaad u soo sheegto Maamulka Sharciyaynta Agabka Caafimaadka (HPRA).

HPRA waa maamul sharciyayn oo ka jira Ireland oo ka shaqeeya daawooyinka, aaladaha caafimaadka iyo agabka kale ee caafimaadka. Fadlan booqo **www.hpra.ie/report** si aad u soo sheegto cilad ka dhalan karta talaalka COVID-19. Waxaad sidoo kale waydiin kartaa Dhakhtarkaaga ama xubin kamid ah qoyska si uu warbixinta xanuunkaaga u gudbiyo.

# Xogtaada shaqsiga ah

Si talaalka qaab amaan ah laguu siiyo loona qoro dhammaan xogta muhiimka ah si loola socdo loona maareeyo talaalka, HSE ayaa uruurin doonta xogtaada shaqsiga ah. Dhammaan xogta ay hayso HSE ayaa waafaqsanaan doonta sharciyada guud iyo si gaar ah Sharciga Difaaca Xogta Guud ee GDPR kaasoo dhaqan galay sanadkii 2018.

Adeegsiga xogtaada ayaa noqon doonto mid sharciga waafaqsan oo cadaalad ah. Waxaa keliya loo adeegsan doonaa ujeedada gaarka ah ee maaraynta talaallada. Mabda'a yaraynta Xogta ayaa la raacayaa.

Tani waxay ka dhigan tahay keliya xogta muhiimka u ah aqoonsigaaga, in balan laguu qabto, loo qoro diiwaankaaga talaalka loolana socdo saamaynada talaalka ayaa la qaadan doonaa.

Waxaad haysataa xaquuqaha soo socda marka xogtaada la isticmaalaayo sida ku cad GDPR kuna aadan xogtaada shaqsiga ah ee la adeegsado.

- Inaad codsato aadna hesho xogtaada gaarka ah, oo badanaa loo yaqaano 'codsiga helitaanka ee xogta macmiilka'. Tani waxay kuu sahlaysaa inaad hesho koobiga xogta Shaqsiga ah ee aan kaa hayno aadna hubiso inaan sifo sharci ah u adeegsanayno.
- Inaad codsato sixitaan lagu sameeyo xogta shaqsiga ah ee aan kaa hayno. Tani waxay kuu sahlaysaa inaad saxdo xog kasta oo kala dhiman ama khaldan oon kaa hayno.
- Inaad codsato baabi'inta xogtaada shaqsiga ah. Tani waxay kuu sahlaysaa inaad naga codsato inaan tirno ama baabi'ino xogta shaqsiga ah ee aysan jirin sabab aan u sii adeegsano. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad codsato inaan tirno ama baabi'ino xogtaada shaqsiga ah ee aad diiday inaan adeegsano.
- Inaad diido adeegsiga xogtaada shaqsiga ah.

Xog dheeraad ah ayaa laga heli karaa **www.hse.ie/eng/gdpr**

## Meesha aad ka helayso xog dheeri ah

**www.hse.ie** ayaad ka helaysaa xogta faahfaahsan ee COVID-19 oo ka yimid khubaradeena:

- Talaallada la heli karo iyo dadka qaadan kara
- Sida loo qaato talaalka
- Qaadashada talaalka kadib marka cudurku kugu dhaco
- Kuurooyinka talaalka ee lagu talinaayo inaad qaadato
- Go'aan ka gaarista talaalka carruurta
- Astaamaha iyo baaritaanka
- Tallada aad ku difaacayso naftaada iyo dadka kale

Si aad u hesho dheeri ah oo ku saabsan talaalka aad qaadatay, waxaad akhtin kartaa Warqada Xogta Bukaanka ee shirkada daawada samaysay. Tan ayaad helaysaa maalinta aad qaadato talaalka, ama waxaad ka helaysaa **www.hse.ie/covid19vaccinePIL**

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan talaalka, waxaad la hadli kartaa xirfadle caafimaad, sida bixiyahaaga talaalka, Dhakhtar, Farmashiilaha ama kooxda caafimaadka.

Waxaad sidoo kale wici kartaa HSELive oo aad ka wacayso Taleefanka Bilaashka ah **1800 700 700.** Kooxdeena ayaa halkaan joogta si ay kuu caawiyaan Isniinta ilaa Jimcada 8am ilaa 8pm ama Maalmaha Sabtida 9am ilaa 5pm.

COVID-19 VACCINE

Waxaa daabacday HSE Agoosto 2024

Si aad u hesho xogtii ugu danbaysay booqo **www.hse.ie**

Koodhka Amarka: HNI01602

Rialtas na hÉireann
Government of Ireland